

CIBAADADA QEEXIDEEDA

Halkan waxaan ku soo rarayaa culimada shaaficiyada qaarkood oo cibaadada qeexaya bal hadde aan ka faa'iideysanno :

Cibaado qeexiddeeda oo tifatiran waxa uu ku soo ururaya in ay tahay : u hoggaansamid iyo isu dullayn qofku khiyaar u sameeyo asal ahaanna lagu raadsado anfac si qarsoon ku yimaadda .

Qeexiddas haddaan si kooban u sharraxno :

(u hoggaansamidda iyo isu dullayntu) waxay noqon karaan adeecid ama wayneyn labada kii lala yimaaddaba.

(qofku khiyaar usameeyay) oo aan la qasbin.

(asal ahaan lagu raadsado) qofka ficolkaas sameeya ayaa waxa lagu yaqaan in uu ku raadsado anfac markaa ficolkii guud ahaan cibaado ayuu noqonayaa qofkan hadda samaynayaa ama ha ku raadsado anficii sida kuwa awliyada tuugaya ama yaanu ku raadsan e sida qof ogsoon in uusan sanamku wax tari Karin haddana u sujuudaya , ama sujuudda sanamka ku raba in uu cid sanamka aaminsan wax kaga qaato , ama u sujuudaya sanamka isagoo iska ciyaaraya , culimada fiqiguna ka sidaa sameeya murtad ayay ku xukumeen, waayo cid aan Allaah ahayn ayuu caabuday.

(anfac) ama ha noqoto dhib faydid ama dheef soo jiidid.

(si qarsoon ku yimaadda) oo gaybi ah oo loola jeedo wax aan ahayn asbaabaha caadiga ah ee la dareemi karo ama la arki karo,

sida in aad qof dhintay wax waydiisato, ama qof kaa maqan aad wax weydiisato adigoon kula xiriirin asbaabta caadiga ah ee la iskula xiriiro, ama qof nool oo kula jooga aad waydiisato wax awoodda bini aadamka ka baxsan sida in aad roob iyo ilmo waydiisato.

Qeexidda (Ilaah)

Ilaah waa ku la caabudo , qofka caabudayaan aha ha sheegto in macbuudkaasi mutaystay in la caabudo ama yaanu sheegan, ficiil ha u sameeyo cibaado ah ama ha aammino -kaliya- in uu xaq u leeyahay in la caabudo, waxaas oo dhan qofka mid ka mid ah cid u la yimaaddaa ciddaa ilaah ayuu ka dhigtay, kan u danbeeya ee aaminaadda kaliya laga helay wuu caabuday ciddaa waayo aaminaadda uu aamminsan yahay in uu xaq u leeyahay in la caabudo waxa ku hoos jira u hoggaansan iyo isu dullayn asal ahaan lagu raadsado anfac si qarsoon ku yimaad.

Sidoo kale waxa soo galaya ilaah yeelashada haddii cid laga aammino in uu maamulka koonka wax ka mid ah la kali yahay abuurid iyo arsaaqid iwm, maxaa yeelay maamulka noocaas ahi waa ka lagu mutaysto cibaadada .

Waxaan taas la mid ah in la aammino in cidi shafaaca qaadi karto idanka Allaah la'aantiis oo aan shafaacadiisa marnaba la celin, waayo tan waxay la micna tahay maamulka lala kali noqonayo.

Erayga (ilaah) ee ku jira shahaadada isaga macnihiisu waa (ku cibaado mutaystay) waxaa kalood dhihi kartaa waa (ku caqligu iskii u garan karo in uu mutaystay isu dullaynta asalka ay u tahay raadinta anfac gaybi ah), Allaah oo macbuudkeenna ah caqligu iskii ayuu u garan karaa in uu mutaystay isu dullayn

lagu raadinayo anfac gaybi ah, mushrikiintuna asnaamtooda sidaasay ka aamminsanaayeen, laakiin kacbada iyo xajaral-aswadka sidaa kamay aamminsanayn eh waxay u arkayeen in ixtiraamka kacbada iyo xajarka uu Allaah amray , sidaas awgeed kumay magaacabin kacbada iyo xajarka ilaahyo, ixtiraamkoodana cibaado iyaga la caabudayo kumay magacaabin, sidaas asnaamtoodu way ka duwanayd oo iyaga ilaahyo ayay ku magacaabi jireen.

Qiridda kalmadda tawxiidku waxay diidaysaa in cid aan Allaah ahayni mutaysatay cibaado, waxaanay faaiidaynaysaa – marka lagu kabo waxyaabaha ku xeeran – in uu qofku isku laasiminayo in aanu Allaah wax aan ahayn macbuud ka dhigan.

Haddaba qofki ku hadla ashahaadada ka dibna ay ku dhalato ictiqaadin, ama malo, ama in ay suurta gal tahay in uu cibaado mudan yahay wax aan Allaah ahayn, qofkaasi shaki la'aan waa uu buriyay towxiidkiisi, adduunkase kulama xisaabtami karno in uu muujisto ma ogiye. Sidaa oo kale towxiidkiisu waa uu burayaa hadduu waxaas carrabka ka sheegto qalbigaba wax ka duwani ha ugu jiraane, sidi Fircoon oo kale.

Iyana qofki qira ashahaadada ka dibna caabuda wax aan Allaah ahayn isaguna waa uu buriyay towxiidkiisi, marka laga eego isku laaziminti, yaaban laga helin ictiqaad iyo malo iyo rumaysnaan suurtagalnimo, iyo sheegasho in waxaasi ay cibaada mudan yihiin.

Qofkiise xujo ka heysta xag Alle in uu isu dulleeyo makhluuq, falkaasna kaga raadinaya Alle anfac gaybi ah, isagoo Allaah ku adeecaya, qofkaasi towxiidki waa uu waafaqsan yahay, oo ma khilaafsana, waxaase loo shardiyaa in isdulleyntaasi aanay dhaafsiisnayn inti sharcigu u oggolaa. Oo haddii darajo

isdulleyn ah loo oggolaa oo uu sameeyo mid ka sarreysa taa, oo aan Alle u idmin isagoo ku raadinaya anfac geybi ah, wuxuu buriyay isku laazimintiisi uu isku laazimiyay in aanu Allaah wax aan ahayn caabudin; maxaa yeelay oggolaashada loo oggolaaday qeyb isdulleyn ah ku tusin meyso in isdulleyn kasta loo oggol yahay.

Shakina kuma jiro in Allaah dadka faray in ay maamuusaan dadkii wanwanaagsanaa ee reer Nebi Nuux ay caabudeen, sidoo kalena la faray in ay maamuusaan Nebi Ciise iyo hooyadii, iyo malaa'igtaba, laakiinse markii ay ka tallaabeen maamuuskii Alle u idmay oo ay u gudbeen mid ka siyaadsan, ayay taasi noqotay cibaadadi Alle oo wax kale lala wadaajiyay.

Gunaanadku wuxuu yahay: haddii Alle idan looga haysto isudulleynta wax aan Allaah ahayn, lugu raadinayo anfac geybi ah, taasi waa cibaado Alle la caabuday, sida Alle suuratunisaa' noogu sheegay: Qofkii Rasuulka adeeca Alle ayuu adeecay.

Haddiise aanu arrintaa Alle idan kaga heysan waxay noqonaysaa cibaado la caabuday wax aan Allaah ahayn.

Waxaa hadalkaa waafaqsan hadal ibnuxazmi leeyahay oo ku yaalla kitaabkiisa alfisal fil milali wanixal la yiraahdo 3/147.

Waxaa kale oo waafaqsan sidaa hadalkii shihristaani ka sheegay asnaamtii Laata iyo Cuzaa ee ahaa:

((si dhab ayaan u ognahay in qof caqli lihi intuu qori sawir ka sameeyo, aanu ka dibna ka ictiqaadineyn in kaasi yahay ilaahiis, iyo kii isaga iyo khalqiga kaleba abuuray, ee duulkaasu markii ay ku mammanaadeen in ay qalbigooda u jeediyaa, oo wixii ay u baahnaayeen ayaga ka dalbeen iyada oo aysan Alle oggolaasho ka

heysan, ayay dul hogashadaasi cibaada noqotay). Ka fiiri kitaabkiisa almilal wanixal: 287.

Sheekh Dr. Cuthman Macalim Maxamuud